Seattle DCI (Seattle Waaxda Dhismaha iyo Baadhitaanka)

sdci

Tip 612

Xeerka Waafaqsanaanta

— hagaha xeerarka Seattle ee ku saabsan badbaadada iyo tayada nolosha

Goorta iyo Sida Warbixinta Ku Xad-gudubka Xeerka Loogu Gudbinayo Seattle DCI

Warkii u dambeeyay February 24, 2009

Seattle Department of Construction and Inspections (Seattle DCI, Seattle Waaxda Dhismaha iyo Baadhitaanka) waxay dhaqan-gelisaa in badan oo Xeerarka Magaalada Seattle ah. Seattle DCI sida caadiga ah waxay bilowdaa baadhitaanka xadgudubyada Xeerka marka bulshadu ay soo weriso xadgudub iman kara.

Dhukumentigani waxa uu sharaxayaa xadgudubyada iman kara ee ay tahay in warbixintooda loo gudbiyo Seattle DCI iyo sida Seattle DCI ay u baadho, una xaliso warbixinahaas.

Tallaabooyinka Warbixinta Xadgudubka Xeer

1. Hubi in Xadgudubyada iman kara ay yihiin kuwo Seattle DCI ay dhaqan-geliso. Eeg qaybta soo socota tusayaalayaasha ku saabsan xadgudubyada iyo xeerarka ay dhaqan-geliso Seattle DCI.

2. La xidhiidh Seattle DCI adiga oo wacaya Khadka Cabashada Xadgudubka ee (206) 615-0808 ama waraaq u soo qor Seattle DCI Code Compliance, P.O. Box 34019, Seattle, WA 98124-4019. Waxa kale oo aad booqan kartaa Shaqaalaha Waafaqsanaanta Xeerka oo jooga Dabaqa 19 ee Fooqa Dowladda Hoose ee Seattle oo ku yaalla 700 Fifth Ave., wuxu furan yahay 8:00 a.m.-5:00 p.m., Isniin-Jimce. Fadlan hubi in aad sheegto in aad doonayso in aad ka warbixiso ku xadgudub xeer oo iman kara. Waa in aad bixiso ciwaanka Hantida uu ka jiro xadgudubku, ama ciwaanka la jaarka ah hoygaas ama Wadada goysa goobtaas xadgudubka, si uu markaa qofka baadhaha ah u helo goobta xadgudubka.

   Sida oo kale waxa aad cabashada ka gudbin kartaa khadka internetka ee: http://web6.seattle.gov/dpd/complaintform/

   Ma aha in aad magacaaga bixiso marka aad sheegayso xadgudub iman kara. Haddii aad sameyso, waxad weydiisan kartaa Seattle DCI in magacaaga la qariyo. Balse, haddii baadhitaanku keeno dacwad maxkamadeed Seattle DCI lagama yaabo in ay awoodo in ay magacaaga sir ka dhigto.

   Marka loo baahan yahay baadhitaanka dhisme gudihiisa, magaca iyo telefoonka qof lala xidhiidho oo u oggolaan kara baadhaha in uu gudaha galo ayaa muhiim ah. Qofka baadhaha ah waa in uu arko xadgudub kahor inta aanu bilaabin in uu qaado tallaabo fulin ah.

3. Waad ogaan kartaa xaaladda warbixintaada iyo natiijooyinkii baadhitaanka adiga oo wacaya (206) 615-0808. Cabashada sida caadiga ah waxa loo dhiibaa qof baadhe ah muddo hal toddobaad gudaheed ah marka Seattle DCI ay hesho warbixinta xadgudubka iman kara.

   Waxa kula soo xidhiidhi doona baadhaha loo dhiibay haddii aad bixisay macluumaadka xidhiidhkaaga iyo haddii aad dalbatay in laguu sheego natiijada baadhitaanka.

   Xaaladda Baadhitaanka waxa kale oo laga heli karaa bogga internetka Seattle DCI ee www.seattle.gov/dpd/compliance. Waxaad u baahan doontaa ciwaanka Hoyga ama nambarka kiiska.

Tusaalayaasha Xadgudubyada Iman kara

- Hawl dhisme oo la fuliyo oggolaansho la'aan.
- Arrimaha Badbaadada la xidhiidha sida dhismayaal dumaya ama gidaaro soo dhacaya, dildilaacyo dhul oo khatar ku haya dhisme, kulayliyayaal aan badbaado lahayn ama wiishka guryaha ama mushkilado laydh oo dhibaato leh.
- Shaqo aan waafaqsanayn qorshayaasha la og-

City of Seattle
Department of Construction and Inspections

700 5th Avenue, Suite 2000
P.O. Box 34019
Seattle, WA 98124-4019
(206) 684-8600

golaaday ee la xidhiidha oggolaanshaha.

- Dhisme ka badan saacadaha la oggol yahay in laga shaqeeyo ama uu ka dhasho qaylo siyaado ah.
- Shaqo ka socota xeebta ama shaqo ka socota hareeraha xeebta oo horjoogsanaysa adeegsiga goobaha dadweynaha u dhex ah.
- In loo isticmaalo dhisme si aan waafaqsanayn Shahaadada Degitaanka ee la bixiyay ama aan laga oggolayn goobtaas, tusaale ahaan in dhisme bakhaar loo isticmaalo hool lagu jaaso.
- Xaaladaha liita ee guryaha kirada ah, sida daaradda oo burburta, kulaylin la'aan ama mushkilado nadaafadeed.
- Wargelinta cid kiro ku jirta in laga saarayo guri ama qol kiro ah iyada oo aanay jirin sabab sharci ah.
- Dhismayaasha aanay cidi deggenayn oo aan si fiican loo xidhin si looga ilaaliyo in la galo ama Cimiladu waxyeesho.
- In Ganacsi sharcidarro ah laga sameeyo Goobaha la deggan yahay.
- In laga sameeyo guryo laba-degsiimo ama sadex-degsiimo oo sharci darro ah meelaha loogu talogalay qoysaska keliya.
- Baabuur kharaabay in la hordhigo hantida gaarka loo leeyahay ee goobaha la deggan yahay.
- Qaylada ka soo baxaysa qalabka mishiinada dibadyaalka ah.
- Beddelitaan, xaalufin iyo/ama dhir jarid siyaado ah oo lagu sameeyo goob degaan ahaan muhiim ah.
- Jaritaanka dhirta ama jaritaanka caleemaha sare ee geedaha ku yaalla tiiro kacsan.
- Dhismaha gidaaro haya tiiro kacsan iyada oo aan loo haysan sharci oggolaansho.

Xeerarka ugu waaweyn ee ay dhaqangeliso Seattle DCI

- Xeerarka Dhismaha oo dhigaya heerka dhismayaasha cusub, dibuscussboonaysin iyo hawlaha kobcinta dhulka (sida carro-rogga).
- Xeerka Guryaynta iyo Dhismaha oo dhigaya waxyaabaha loo baahan yahay si loo helo guryayn kiro caafimaad iyo badbaado leh. Xeerkani waxa uu dhigayaa heerka amni ee looga baahan yahay dhammaan dhismayaasha kale, oo ay ku jiraan kuwa aan la deggenayn.
- Xeerka Isticmaalka Dhulka oo isna dhigaya heerka sida dhulka loo isticmaalayo dhammaan goobaha horumarineed.
- Xeerka Dhirta gaagaaban iyo kuwa ka dulbaxa geedaha oo gargaara kantaroolka xaaladaha khatarta ah ee ay sababaan dhirta ku soo baxda waddooyinka, wadada dhinaceeda ama wadiiqooyinka dadku maraan ee laga shaqeeyay. Xeerkani uma dejinayo joogga ugu sarreeya dhirta ka baxda Hanti gaar loo leeyahay.
- Xeerarka Sabab Deg-deg ah u Saarista, waxa uu bixinayaa sababaha macquulka ah ee dadka Hoyga leh ay uga saari karaan dadka ay ka kireeyeen.
- Xeerka Kaalmada Guuritaanka Kiraystaha waxa uu siinayaa faa'iido dadka lagu khasbay in ay ka baxaan dhismahooda maadaama lagu sameynayo dayactir. Faa'iidooyinkaas waxa ku jira taakulo lacageed oo la siinayo dadka kiraystayaasha ah ee dakhligoodu hooseeyo iyo in hore loo siiyo ogeysiin ah in dayactirka la qorsheeyay.
- Xeerka Sawaxanka, waxa uu heer u dejinayaa qalabka sameeya cod dhaadheer. Tusaalayaal waxa ka mid ah qalabka loo isticmaalo kulaylinta, hawo qaboojinta, laydhinta, talaagadda, hababka waxsoo-saarka iyo dhismaha.
- Goobaha Muhiimka ah Degaan ahaan waa xeer u sameynaya heer lagu horumariyo goobaha dhulku dilaaca-foorara yeesho, tiirooyinka kacsan, webiyada ama gabiyadaha iliiladaha biyaha, goobaha daadadka, dhulka qoyan, iyo goobaha kalluunka iyo duurjoogta degaanka u ah.

Sida Seattle DCI uga jawaabto Warbixinaha Xadgudubka

Seattle DCI waxay baadhitaan ku sameysaa warbixinaha xadgudubyada xeer ee iman kara. Ahmiyadaha ugu sarreeya ee Seattle DCI waa caafimaadka iyo Badbaada xadgudubkooda. Cabashooyinka degdegga ah waxa la baadhi doonaa muddo 24 saacadood gudahood ah marka warbixinta la helo haddii aanay warbixintu ahayn mid la gudbiyay kadib 2.00 p.m. Maalinta Jimcaha. Xaaladaha deg-degga ah ee nolosha khatar gelin kara iyo cabashooyinka saacadaha dambe ee Qaylada waa in loo sheego oo la wacayo 9-1-1.

Seattle DCI waxay ka jawaabtaa xaaladaha degdega

REEBITAAN SHARCI: Waraaqdan Taageerada Macmiilka (Tip) looma adeegsan karo in ay beddel u noqonayso xeerarka iyo shuruucda. Qofka codsdaha ah ayaa ka masuul ah in uu u hoggaansamo dhammaan shuruucda iyo xeerarka loo baahan yahay, ha lagu sheego Waraaqdan ama yaan lagu sheegin.

ah ee guryaynta, ama sticmaalka dhulka iyada oo la bixinayo "Amar Xaalad Deg-deg ah" oo u baahan waafaqsanaanta ama in si deg-deg ah loo waafajiyo, sida caadiga ah ha lama laba maalmood. Seattle DCI waxay amri kartaa dhisme in si deg-deg ah loo banneeyo marka uu yahay mid aan badbaado lahayn. Ku xadgudubka Amarka deg-degga ah ee Seattle DCI waxa uu keeni karaa dacwad fal-dambiyeed.

Xaaladaha aan deg-degga ahayn ee guryaynta iyo dayactirka guryaha waxa badiyaa la baadhaa muddo toban maalmood gudahood ah. Ku-xadgudubka Xeerka Isticmaalka Dhulka waxa la baadhaa muddo 15 maalmood gudahood ah hawsha.

Marka ay Waaxdu xaqiijiso xadgudub xeer, Seattle DCI waxa ay u sheegaysaa qofka Hantida leh, oo ay ka codsanayso in uu tallaabo qaado uu ku saxayo xadgudubkaas. Haddii qofka hantida leh aanu hagaajin xadgudubkaas, Seattle DCI waxa ay soo saaraysaa Yeedhmo ama Ogeysiis Xadgudub, ama marmarka ay jirto xaalad deg-deg ah ama xaalad khatar ah oo iman karta, waxa la soo saarayaa Amar Deg-deg ah ama Amarka Sixitaanka Khatarta.

Yeedhmada waxa ka dhalan kara Ganaax lacageed oo deg-deg ah. Qofka loo keeno Yeedhmo waxa uu dalban karaa in dacwaddiisa la dhegeysto si uu isaga difaaco yeedhmada ama waxa uu codsan karaa ganaax ka yar.

Ogeysiiska Xadgudubku waxa uu bixiyaa wakhti cayiman in lagu saxo xadgudubka xeerka. Wakhtigaasi la bixiyay waxa uu ku salaysan yahay dabeecadda iyo khatarta xadgudubkaas. Hantiilayaashu waxay codsan karaan Dib u eegista Agaasimaha Maamulka ee Ogeysiiska Xadgudubka. Haddii dadka hantida leh ay si deg-deg ah u helaan oggolaanshaha sharci ee muhiimka ah ama haddii kale ay sameeyaan sixitaanka loo baahan yahay kadib marka Seattle DCI ay u sheegto in uu jiro xadgudub xeer, Seattle DCI sida caadiga ah kama qaado wax tallaabo sharci ah si loo qaado ganaax.

Haddii qofka hantiilaha ah aanu sixin xadgudubkaasi wakhtiga loo muddeeyay, Seattle DCI waxa laga yaabaa in ay kiiskaas u gudbiso Waaxda Sharciga ee Magaalada si looga qaado Tallaabo Maxkamadeed oo keeni karta Ganaax lacageed (ganaax) oo ay soo rogto Maxkamaddu. Intaas waxa dheer, lacagta baadhitaanka ayaa laga qaadi karaa marka xadgudub si deg-deg ah loo sixi waayo iyo baadhitaano dhawr ah oo loo baahan yahay si loo xaqiijiyo Waafaqsanaanta.

Seattle DCI waxay u baahan kartaa in oggolaansho sharci la helo marka dhisme loo adeegsanayo ujeedo aan loo sharciyayn, waxana ay tallaabo ka qaadi kartaa dhismaha la dhammaystiray oggolaansho sharci la'aan. Qodobada fulinta waxa ku jira in loo baahan karo in dhismaha aan lahayn oggolaansho fasax la burburiyo, lagu soo rogo lacag dheeraad ah oo oggolaanshaha fasaxa ah, ama loo gudbiyo tallaabo sharci si looga qaado ganaax madani ah. Marka dhisme la sameynayo oggolaansho sharci la'aan, Seattle DCI waxa ay mamnuuci kartaa dhismahaasi in la sii wado inta laga helayo oggolaansho sharci iyada oo soo saaraysa amar ah shaqo-joojin. Ku xadgudubka Amarka Shaqo joojintu waxa uu keeni karaa Dacwad Fal-dambiyeed.

Arrimo Muhiim ah in la Xasuusto

Fadlan waxaad bixisaa ciwaanka saxda ah marka aad sheegayso xadgudub xeer oo iman kara. Waxaad bixisaa Mashruuca Seattle DCI ama nambarka oggolaanshaha sharci haddii oggolaansho sharci oo dhisme ama calaamad weyn laga taago goobta xadgudubka.

Xadgudubyada iman kara waa in loo warbixiyo Telefoonka Cabashooyinka Xadgudubyada Xeerka oo ah (206) 615-0808.

Helitaanka Macluumaad

Xeerarka lagu sheegay Waraaqdan Taageerada Macmiilka (CAM) waxa laga heli karaa iyaga oo ah nooca elektarooniga waxa laga heli karaa barta internetka Seattle DCI ee **www.seattle.gov/dpd/codesrules/**. Nuqulada Waraaqaha ee dhukumentigan waxa laga heli karaa Xaruntayada Macluumaadka Dadweynaha, oo ku taalla dabaqa 20aad ee Fooqa Dowladda Hoose ee Seattle oo ku yaalla 700 Fifth Ave. in downtown Seattle, (206) 684-8467.

REEBITAAN SHARCI: Waraaqdan Taageerada Macmiilka (Tip) looma adeegsan karo in ay beddel u noqonayso xeerarka iyo shuruucda. Qofka codsdaha ah ayaa ka masuul ah in uu u hoggaansamo dhammaan shuruucda iyo xeerarka loo baahan yahay, ha lagu sheego Waraaqdan ama yaan lagu sheegin.